



Martigaad: Dulmarka Aragtida Waxbarasho ee PPS

Luulyo 7 2022

Qoysaska PPS ee qaaliga ah,

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa ka go'an in ay siiyaan dhammaan ardayda waxbarid tayo sare leh oo ka caawisa ardayda fasalada oo dhan in ay gaadhaan Sawirka Qalinjabinta. Waxaan qaadaynaa tillaabooyin muhiim ah sannad dugsiyeedka soo socda si aan u hubinno waxbaridda iyo waxbarashada tayada sare leh ee fasal kasta, maalin kasta. Waxaan soo bandhigaynaa agab manhaj cusub oo dhaqan ahaan khuseeya iyo qaab-waxbarasho oo cusub si macallimiinta loo siiyo agabka ay u baahan yihiin.

Xagaagan, **waxaanu kugu casumaynaa** inaad ku soo biirto kulanka barashada bulshada iyo doodaha ku saabsan aragtida waxbarida iyo khariidaddeena ku wajahan sinnaanta ardayda oo dhan. Dhacdadani waxay ahaan doontaa horraanta Ogosto - **fadlan buuxi [foomkan](#) ka hor 25-ka Luulyo kama dambaysta ah haddii aad xiisaynayso ka qaybgalka dhacdadan ama dhacdooyinka mustaqbalka.**

Anagoo kaashanayno macallimiinta, hogaamiyaasha dugsiyada, iyo shaqaalaha degmada oo dhan, waxaan ka shaqaynaynaa sidii aanu hiigsigeena u noqon lahaa mid dhab ah dhammaan ardayda, oo ay ku jiraan qaab-dhismeedka hab-waxbarasho oo tafaasiil ka bixinaya aragtida aan wadaagno ee waxbarida iyo barashada, soo bandhigida agab manhaj cusub si ay u taageeraan waxbaridda fasalka, iyo bixinta waayo-aragnimada tababarka ee macallimiinta si ay u taageeraan labadaba. Hoos waxaa ku yaal tafaasiil dheerad ah oo wax badan ka baran kartaa [dulmar ka kooban 1 bog](#) iyo [muuqaalkan](#).

Qaab-dhismeedka Waxbarashada:

Waxaan sameynay [Qaab-dhismeedka Waxbarashada](#) ee sinnaanta afar meelood oo diiradda lagu saarayo oo ay ku jiraan tilmaamayaasha ay tahay inay ardaydu la kulmaan dhammaan fasalladooda - aragti la wadaago oo ku saabsan sida waxbarashadu u eg tahay PPS. Qaab-dhismeedka dhexdiisa, waxbarashadu waa inay noqotaa heerka fasalka & jaangooyooyinka la jaan qaadaya, dhaqan ahaan xaqiijinaya, si qoto dheer uga qayb qaadanaya, iyo xogta la wado.

Qaadashada Manhajka:



Waxaan hirgelin doonaa agabka manhajka ee la cusboonaysiiyay, dhaqanka-xiriirka leh ee Farshaxanka Luqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta heer kasta bilawga sannad dugsiyeedka 2022-23, iyo dhammaan maadooyinka muhiimka ah saddexda sano ee soo socota.

Barashada Xirfadlaha Macallinka:

Qaab-dhismeedka waxbarashada iyo qaadashada manhajka ayaa noqon doona aasaaska sanad-dheer ee barashada barayaasha oo ay ku jiraan fadhiyada xagaaga, tababarka shaqada kahor, tababarka fasalka socda, iyo kooxda waxbarashada degmooyinka.

Waxaan jeclaan lahayn inaan wax badan kula wadaagno oo aan kaala hadalno - **fadlan buuxi [foomkan ugu dambayn Luulyo 25-keeda haddii aad xiisaynayso ka qaybgalka dhacdooyinka mustaqbalka.](#)**

Mahadsanid iyo xagaag wanaagsan,

Waa maxay: Dulmarka Aragtida Waxbarasho ee PPS

Qofkee: Xubin kasta oo qoyska ka mid ah ama daryeel bixiyaasha hadda ama arday mustaqbalka PPS ah (dhammaan fasallada)

Goorma: Waxaa la go'aamin doonaa Horraanta Ogosto, iyadoo lagu salaynayo jawaab celin

Wagtiga: Galabta dambe ama Fiidka, oo ku salaysan jawaab celin

Goobta: Xafiiska Degmada Dugsiyada Dadweynaha Portland

Cinwaanka: 501 N. Dixon St., Portland, OR 97227

***** Casho iyo xanaano caruur ayaa lagu bixin doonaa LACAG LA'AAN!*****